



Meelaha guud ee leesugu imaanayo iyo kulamada guud ka yarey faafitaanka cudurka

Meelahaas waxaa sida uu qabyo xeerka ku meel gaarka ah ee covid-19 waajib ku ah in ay ka hortagaan faafitaanka cudurka iyagoo hawlaha u wadaya si keeneysa in ciriiri laga fogaado iyo in dadku ay isu jirsan karaan masafo aamin ah marka laga eego dhanka ka hortagga

Adigaaga abaabulaya kulan guud ama xaflad dadweynaha u furan waa in:

- Aad tirada ka qeybgalayaasha ku sintaa ugu badnaan 8 ka qeybgale.
- Aad tirada ka qeybgalayaasha kulanka guud ee loo qabanayo arrimo diimeed oo ay dhimasho ugu wacantahay ku sintaa ugu badnaan 20 ka qeybgale.
- Guddiyada goballadu waxay fursad u haystaan in ay si intaas ka dheeri ah u sii yareeyaan tirada ka qeybgalayaasha. Sidaasi sidoo kale waa ay ka dhacday goballada oo dhan, sidaas awgeed waxay xannibaadaha ku aaddan ugu badnaan 8 ka qeybgale xitaa khuseeyaan xafladaha leh dadweyne fadhiya.

Hindise ku aaddan macluumaad aad siin kartid booqadayaashaada, ka qeybgalayaasha ama macaamiisha oo ku saabsan talooyinka guud ee looga hortegi karo faafitaanka cudurka waxaad ka heleysaa folkhalsomyndigheten.se

Informationsblad för verksamhetsutövare som anordnar allmänna sammankomster och offentliga tillställningar på somaliska.
Publicerat 2021-03-25.

Waxaa macluumaadkan la faafiyay 2021-03-25. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad si joogto ah ula socotid xeerarka markaas taagan. Tani warbixin gaaban oo ku aaddan waxa uu xeerka covid-19 ee ku meel gaarka ahi uga dhiganyahay meheredlayaasha ee abaabulaya kulamo ama xaflado dadweyne. Fiiro gaar ah u lahaw in sharciyadi, xeerarki iyo qaraarradi horay loo gaaray iyo talooyinki guud ee lagu yareynayay faafitaanka cudurku ay sii shaqeynayaan.

Si aad u aragtid sharciga oo dhammeystiran iyo qoraalka qaraarka waxaa lagu tilmaamayaa riksdagen.se. Si aad u aragtid xeerka oo dhammeystiran, talooyin guud iyo macluumaad guud waxaa lagu tilmaamayaa folkhalsomyndigheten.se. Macluumaadka xukuumadda ee ku aaddan covid-19 waxaad ka heleysaa 1177.se. Macluumaadka xiriirka ee Guddiga gobalka iyo macluumaad markaas taagan oo ku aaddan ka warhaynta xagga shuruucda covid-19 waxaad ka heleysaa lansstyrelsen.se.